Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha

Qaybta Naafada Korriinka Kheeyraadka DD

Luuliyo 2025

NEBRASKA
Good Life. Great Mission.

Go'aaminta Xaddidaadda Daawooyinka Maskaxda Saameeya

Daawadani ma ka mid baa daawooyinka saamayn ku yeesha maskaxda iyo dareenka shucuureed?

Daawadani ma loo kala saaraa sidii kiciyayaal, niyad-jabitaanka loo qaato, xasilinta niyadda, daawooyinka waallida, ama daawooyinka ka-hortagga welwelka)? Mise waxaa daawadani loogu adeegsanayaa ujeeddo la mid ah mid ka mid ah qaybahaas daawooyinka ah? *Tusaale ahaan: Benadryl ma hurdada ayaa loo adeegsadaa?*

Haa → Maya

Ma leeyahay ma'uul ka faaidaystaha mise weli waa qof da'yar (ka hooseeya 19 sano jir)?

Haa → Maya

Ma jiraa diwaan uu qoray dhakhtarka daawada faray oo u diyaar ah kooxda PCP si ay u eegaan?

Haa → Maya

Dukumeentiga uu qoray dhakhtarka daawada faray ma ku jiraa cudurka/baadhista loogu qoray daawadaas? Cudurka/baahida caafimaad waa in si cad loogu diwaangaliyo dhakhtarka qoraya daawada, iyadoo aan loo eegin waxa lagu qoray PCP, MAR, ama meel kale.

Haa → Maya

Ma cudur caafimaad ama xanuun dhimir oo dhakhtarka qoray daawadu ku sheegay uu yahay mid si rasmi ah caafimaad ahaan loo aqoonsan yahay? *Tusaale ahaan: cudurka walbahaarka guud (ma aha oo keliya walbahaar) ama cudurka qarax xanaaqeed ee goos-gooska ah (ma aha oo keliya xanaaq).*

Haa → Maya

Ma ku jiraa qoraalka dhakhtarka qoray magaca daawada iyo qiyaas-teeda?

Haa → Maya

Miyaa lagu qoray diwaanka dhakhtarka qoray sababta loo qoray daawada? Waa in uu faahfaahsan yahay si si cad loo fahmo sababta daawada loo qoray. *Tusaale ahaan: "hurdada"ma ahan sharaxaad ku filan, sababtoo ah akhristuhu ma garan karo in ka-qaybgaluhu dhib ku qabo inuu seexdo ama uu hurda badan seexdo.*

Haa → Maya

Miyeey muujinaysaa qoraalka dhakhtarka daawada qoray in wax isbeddel ah lagu sameeyay daawada markii ugu dambeysay ee dib loo eego oo haddii ay sidaas tahayna sharaxayaa isbeddelladaas? Haddii wax isbeddel ah aan la samayn, qoraalka waa inuu si cad u qeexaa "wax isbadal ah majiro."

Haa → Maya

Daawada ma waxaa qoray bixiye adeegyada Naafada Horumarineed (DD)?

Shaqaalaha bixiyaha adeegga ma ka qayb qaataan WAX KASTA oo la xiriirta bixinta ama qorista daawada? *Tusaale ahaan: ku baraarujinta ka-qaybgalaha inuu qaato daawooyinka, u diyaarin daawooyinka toddobaadka, ka qayb qaadashada hubinta daawooyinka, ama dib u soo qaadida daawooyinka farmashiyaha.*

Haa → Maya

Haa: Daawadu WAA mid wax xaddida.

May: Daawaynta ma**AHAN** mid wax xaddida.

Kooxdu waxay u baahan doontaa inay hesho diwaanka uu qoray dhakhtarka daawada faray.